

DIS127-SO

Bixinta iligga iyo/ama nidaamka qalliinka afka oo dheeri ah ayaa la dhameystiray maanta. Raacidda tilmaamahan qalliinka kadib ayaa kugu caawin doona inay yareeyso dhibaataada, waxayna dhiiri galin doontaa bogsashada qalliinka kadib oo caafimaad leh.

1. Xoogaa dhiigbax ah waa caadi. haduu jiro dhiigbax baddan oo gaduud dhalaalaya:
 - a. Saar faashad la qooyay oo laablaaban meesha iligga laga bixiyay bukaankana ha qaniino si adag mudo 30 daqiiqo ah.
 - b. Haday tani shaqayn weydo, bukanka ha qaniino kiish yar oo caleenta shaaha madow ah oo la qooyay mudo 30 daqiiqo ah. Waxaa ku jira shaaha Tannins oo xididada dhiiga dhuubiya, taas oo kaa caawineyso xakameyta dhiigbaxa qalliinka kadib.
2. Bukaanku waa inuu iska ilaaliyaa luqluqashada, candhuuf tufifadda, isticmaalka tuubada sharaabka lagu dhuuqo mudo 24 saac ah. Ficilladani waxay meesha ka fujin karaan xinjirta sameysmeysa meeshii iliga laga bixiyey.
3. Sigaarka waa in laga fogaado ugu yaraan 2 isbuuc, Sigaarku wuxuu kor u qaadayaa halista bogsashada oo gaabis noqota iyo horumarinta god qallalan
4. Maareynta xanuunka: Ibuprofen _____ mg lixdii saacba mar, Acetaminophen _____ mg lixdii saacba mar. sida haboon waa bukaanku isku mar inuu qaato labaduba cunto kadib. haddii dawo xanuun oo ka duwan laguu qoray u qaado sida lagu faray.
5. baraf la saarsaaro ayaa sidoo kale waxtar yeelan kara. 15 daqiiqo baraf saar, 15 daqiiqo ka nasi, haddii aad u baahato xanuun awgii.
6. Ku luqluqashada biyo qandac ah oo cusbo leh ayaa lagu taliyaa 3 ilaa 5 jeer maalinkii ilaa bogsashada bilowga ah ay dhacdo.
7. Cunto jilicsan ayaa lagu taliyaa 24 saac ee ugu horeeya. dhiiri gali cabista dareere ku filan laakiin iska ilaali dareeraha aadka u kulul ama aadka u qabow. cuntadii caadiga ahayd waxaa loogu noqon karaa hadba sidii loo dulqaadan karo.
8. bukaaku waa inuu iska ilaaliyaa dhaqdhaqaaqa xad-dhaafka ah ilaa inta bogsashada si fiican u dhismeyso.
9. Nadaafada afka aad ayay muhiim utahay inta lagu guda jiro bogsashada qalliinka kadib. jadwalkii caadiga ahaa ee cadayashada ku noqo, sii taageero toos ah. isla maalinta, caday burush jilicsan ayaa lagu taliyaa.
10. Haddii cayngari lagu tolal wuu milmi doonaa ama soo dhici doonaa 3 ilaa 7 maalmood. sikastaba ha ahaatee, ma'aha wax aan caadi ahayn in tolmada ay sii jirto ilaa 14 maalmood.
11. Haddii la isticmaalay kabuubyo, fadlan bukaanka ha taxadaro marka uu wax cunayo ilaa kabuubyada ka baxdo.

Macluumaadkan waxaa loogu talagalay ujeedo waxbarasho oo kaliya. Looguma talagalin inuu badalo talooyinka ay bixiyaan daryeelayaashaada caafimaadka. Haddii aad qabto wax su'aalo ah la hadal dhakhtarkada ama kooxdaada daryeelka caafimaadka.

Haddii aad tahay bukaan Gillette oo qaba su'aalo deg deg ah ama walaac, fadlan la xiriir khadka kalkaalisoooyinka 651-229-3890